



## Waaxda Gaadiidka ee Seattle (SDOT)

### Hey'ada Guryeynta ee Seattle (SHA) Su'aalaha Badanaa Lays-weydiyo ee Gaadiid Raaca

*La cusbooneysiisay Sebtembar 5, 2023*

#### 1. Waa maxey barmaajinka Gaadiid Raaca ee SDOT iyo Seattle Housing Authority?

SDOT's SHA Transit Pass waa kaarka ORCA si buuxda loo kabo oo loogu talagalay deganayaasha xaqa u leh dhammaan guryaha SHA ay leedahay ama la maamulo. Ka qayb galayaasha barmaajinka waxay heliyeen gaadiid raac aan xad laheyn ilaa Dhiseembar 31, 2026.

#### 2. Yaa xaq u leh Barmaajinka Gaadiid Raac ee SDOT iyo SHA?

Dhammaan dadka dagan SHA oo jira 19 sano ama ka weyn kuwaas oo ku nool guryo ay leedahay SHA ama ay maamusho waxay u qalmaan SHA Transit Pass. Ma jiraan shuruudo dakhli u qalmitaanka barmaajikan. Liiska guryaha ay maamusho SHA waxaa laga heli karaa bog-khadkeena ama adigoo [gujinaya halkan](#) .

Waa inaad ku qorantahay qandaraaska kirada si aad u heshid Kaarka Orka. Fadlan la xidhiidh SHA haddii qof qoyskaaga ka tirsan aanu hadda ku jirin liiska kirada guriga oo u baahan in lagu daro.

Nasiib darro, ka qaybgalayaasha Housing Choice Voucher (haysta section 8) ee aan ku noolayn hantida SHA ay leedahay ama ay maamusho uma qalmaan.

#### 3. Xagee baan ku isticmaali karaa Gaadiid Raaca SHA?

Gaadiid Raaca SDOT ee SHA waa Orca kaadh la buuxshay. Waxaad u isticmaali kartaa kaarka in aad si bilaash ah ugu raacdid gaadiidka King County Metro, ACCESS Transportation, King County Water Taxi, Seattle Streetcar, Seattle Center Monorail, Sound Transit, Metro Flex, Community Transit, Pierce Transit, Kitsap Transit, iyo Everett Transit.

Kaararka ORCA kama dabooli doonaan qiimaha Doomaha Gobolka Washington iyo Tareenka Rakaabka ee Souder (Tacoma-Everett).

#### 4. Ma u isticmaali karaa SHA Transit Pass-keyga si aan u bixiyo ACCESS?

Haa. Marka hore, waxaad u baahan tahay inaad isku-xirtid kaarkaaga ORCA iyo akoonkaaga ACCESS. Fadlan kala xidhiidh Xafiiska Adeegga Macmiilka ee Degmada King 206-553-3000 kana codso inay kaadhkaaga cusub ee ORCA ku xidhaan akoonkaaga ACCESS. SHA iyo SDOT kuuma furi karaan tan adiga.

5. **Waxaan ka helay kaarka ORCA buluugga ah ee SHA kahor 2023. Miyaan u baahanahay inaan dib u codsado kaar ORCA ah oo cusub (madow)?**

Uma baahnid inaad dalbato Orca kaadh cusub. Dhammaan kaadhahka shaqeyaya ee dhabarka ku leh summada SHA waa la cusboonaysiiyay waxayna shaqaynayaan illaa Diseembar 31, 2026. Waxaad sii wadi kartaa isticmaalka kaadhka ORCA ee isku midka ah si aad u hesho dhammaan faa'iidooyinka barnaamijkan.



Fiiro gaar ah: akhristayaasha kaadhka ORCA waxa laga yaabaa inay muujiyaan taariikh dhacitaan hore oo aad iska indho tiri karto. Taariikhda dhacitaanku si toos ah ayay u cusboonaysiin doontaa akhristaha (hal sano wakhtigaas) ilaa Diseembar 2026. Uma baahnid inaad codsato kaar beddel ah haddii ORCA-gaagu uu muujinayo taariikhda dhacitaanka kahor Disembar 31, 2026.

6. **Sidee baan u ogaanayaa hadii aan horey u heystey Orca kaadhka barmaanijkan?**

Dhammaan kaadhahka Orca oo la qaybinayo barmaanijkan guduhiisa waxaa dhabarka kaga ooli doonta sumada SHA. Haddii aadan hubin, waxaad kala xiriiri kartaa SHA Transit Pass (206) 615-3551 si aad u xaqiijiso macluumaadkaaga.




7. **Sidee baan u heli karaa Gaadiid Raaca cusub ee SDOT & SHA?**

Si aad u codsato SHA Transit Pass, fadlan buuxi foomkan: <https://civiform.seattle.gov/programs/sha-transit-pass-program>. Foomka waxaa laga heli karaa khadka isagoo ku qoran Ingiriisi, Amxaari, Shiinees (dhaqameed), Kuuriyaan, Soomaali, Isbaanish, Tagalog, iyo Fiidnaamiis. Xusuus ahaan, dadka ku qoran qandaraaska guriga ayaa xaq u leh kaadhka.

8. **Sideen uga diiwaan gashan karaa codsade badan gudaha [Civiform](#) ?**

Si aad u diiwaan geliso codsadeyaal badan oo CiviForm ah, waxaad u baahan tahay inaad gujiso "End session" oo ku yaal geeska midig ee sare ee bogga kadib soo-gudbin kasta si aad u nadiifiso foomka.



9. **Dadka deggan guryaha dakhliga hoose (sida Housing Choice voucher holders) ma u qalmi doonaan mustaqbalka SDOT's SHA Transit Pass?**

Waaxda Gaadiidka Seattle iyo Maamulka Guryeynta Seattle ayaa ka wada shaqeynaya inay qiimeeyaan barnaamijka. Natijada qiimeeyntan, faalada dadweynaha, iyo helista miisaaniyad ayaa hagi doonta sanooyinka soo socda.

**10. Muxuu kaadhkaygu u leeyahay taariikhda dhicitaanka hore marka aan taabto?**

Kaararka ORCA waxay shaqaynayaan ilaa Diseembar 31, 2026, iyadoon loo eegin taariikhda dhicitaanka ee ka muuqata akhristaha kaadhka ORCA. Uma baahnid inaad codsato kaar beddel ah haddii kaarkaaga ORCA uu muujinayo taariikhda dhicitaanka ka hor Disembar 31, 2026.

Fadlan sii wad isticmaalka kaadhkaaga si caadi ah.

**11. Sidee baan u badalaa kaadhka ORCA haduu iga dhumo amase uu xumaado?**

Hadii kaarkaagu dhumo amase xumaado, waanu badaleynaa iyadoon waxba lagugu dalacin. Waxaad codsan kartaa kaarka beddelka adigoo isticmaalaya mid ka mid ah hababka hoos ku qoran.

- A. Xidhiidhka diiwaangelinta SDOT: [Codso Kaarka Bedelka](#)
- B. Ka iimeel-gareeh SHA [TransitPass@seattlehousing.org](mailto:TransitPass@seattlehousing.org) oo raaci magacaaga, tcode, iyo cinwaanka boostada.
- C. Wac ama qoraal u dir (206) 615-3551 adoo raacinaya magacaaga, tcode, iyo ciwaanka boostada.

Waxaanu xaqiijin doonaa u-qalmitaankaaga oo aanu kuugu soo diri doona kaadhka bedelka laba toddobaad gudahood.

Kaarkaagii hore waa la xiri doonaa marka lagu siiyo kaar cusub.

**12. Sidee baa barnaamijkaan loo maalgeliyaa?**

Barmaamijka waxaa maalgaliyey Seattle Transportation Measure (STM) (Cabirka Gaadiidka ee Seattle), horeyna loogu yiqiin Seattle Transportation Benefit District (STBD) (Faa'iidooyinka Degmeed ee Gaadiidka Seattle). STM waa canshuur ay ogolaadeen codeeyayaasha, waxaana la ogolaaday Nofeembar 2020 waxay dhici doonta Abriil 2027.

**13. Ka warran haddii aanan u qalmin barnaamijkaaga, ma jiraa barnaamij kale oo aan codsan karo?**

King County Metro wuxuu leeyahay dhawr barnaamij oo qiimaha laga dhimay! Waxaad ka eegi kartaa barnaamijyada ku qoran shabakadooda oo aad fiirin kartaa shuruudaha xaq u yeelashada si aad u go'aansato inaad u qalanto <https://kingcounty.gov/en/dept/metro/fares-and-payment/discounted-fares> <https://reducedfare.kingcounty.gov/en-US/>

Waxaad sidoo kale wici kartaa lambaradaan:

- ORCA LIFT 800-756-5437;
- Dhammaan kaadhahka qiimaha laga dhimay ee kale: 206-553-3000

**14. Hadii aan hayo su'aalo dheeraad ah, yaan la soo xiriiraa?**

**Kooxda SHA Transit Pass**

lIMEEL: TransitPass@seattlehousing.org

Taleefanka (wac ama qoraal u dir): ( 206) 615-3551

Macluumaadka ku saabsan barnaamijka waxa kale oo laga heli karaa bog-khadka SDOT:

[www.seattle.gov/transportation/TransitPassProgram](http://www.seattle.gov/transportation/TransitPassProgram) .